# Doorashooyinka Puntand: Daaraasad Gaar ah-
# Ururka Kaah iyo Gobolka Sanaag
## Tifaftirka WardheerNews
**May 23, 2023**

---

**Hordhac:**

Soomaliya guud ahaan muddo ka badan 54 sano kama aanay dhicin doorashooyin qof iyo cod (1p1v) heer Baarlamaan (golaha wakiilada) iyo heer degaan, maadaama waddanku muddo badan uu ku jiray xukun Milateri, burbur iyo dowlad la'aan. Marka laga reebo Soomaaliland oo ku dhawaaqday in ay Soomaaliay inteeda kale ka go'aday sanadkii 1991, islamarkaana ay ka hirgaleen doorashooin qof iyo cod ah, oo ku dhisan nidaamka xisbiyada badan (multiparty system), ma jirin dalka intiisa kale qorshe doorashooyin ku salaysan nidaamka dimiqraadiyadda oo ka hirgalay.



M/weyne Siciid Cabdullaahi Deni, ol'olaha doorashooyinka Golayaasha Degaanka Puntlant, ee ururka KAAH, 2023

Dowlad Gobeeldka Puntland, ayaa in muddo ah ku taamaysay qabashada dooasho qof iyo cod, iyada oo muwaadiniinta reer Puntland kadib dowlad dhiskii Puntland muddo afar iyo labaatan (24) sanno sugayeen inay codkooda si xor ah u dhiibtaan, fursadna u helaan metelaad rasmiya, ha ahaato gole degaan ama Xildhibaan.Waxay shacabku muddo badan dhawrayeen in ay helaan hannaanka dimuqraadiga ah ee dastuurku dhigayo, fursaddaasi oo hadda u muuqata mid laga dhabaynayo muddo xileedka dowladda talada heysa ee Madaxweyne Siciid Cabdullaahi.

Guddiya dhawra oo loo xilsaaray maamulka iyo habsami u socodka doorashooyinka Puntland (TPEC), ayaa horey ugu fashilmay in ay dhaqaajiyaan hannaanka Dimuqraadiyaynta Puntland, balse guddiga 3-aad ee hadda jira, oo uu Baarlamaanka Puntland ansixiyey 16- Nof- 2019 ayaa markii u horaysay dhaqan geliyey waajibaadkii loo igmaday ee diyaarinta, abaabulka iyo kormeerka doorashooyinka ka dhaca degaannada Puntland.

Guddigu wuxuu hirgeliyey doorashada saddex degmo **(Ufayn, Eyl, iyo Qardho)**, oo hordhac ahaa (early election) sandkii 2021, loogana gollahaa in laga barto casharo gogol xaar u noqota doorashada degmooyinka kale, si hannaanka dimuqraadiyeynta Puntland tub saxan loogu jeexo. Waxay guddigu codsiyada urur ka mid noqoshada ka qabteen 17 urur siyaasaddeed, oo ay hadda liiska xildhibaanada golayaasha degaanka u gudbiyeen 7 –ba urur.

Waxaa kamida sagaalka (9) urur ee u tartamayay in ay kusoo baxaan  xisbiyada ( 3 ama in ka badan) siyaasaddeed ee Puntland yeelan doonto, Urur Siyaasaddeedka KAAH, oo ah ururka dowladda hadda jirta ee Puntland. Ururkaas Kaah oo ay ku wada jiraan xubnaha golayaasha dawladda Puntland.

Ururka KAAH waxaa guddoomiye ka ah Madaxwaynaha Puntland, waxaana kala oo ka mid ah ururka inta u baddan golayaashiisa dawladda, sida xildhibaano, wasiirro, guddoomiyayaasha gobollada iyo degmooyinka.

Waxa jirta eedeymo badan oo soo baxaya, kuwaasi oo sheegaya cabbudhin, cadaadis iyo ku takri fal awooddeed,  xubno ka tirsan ururka dowladda ee Kaah ay ku raadinayaan cod iyo taageero, iyaga oo adeegsanaya awoodda iyo hantidada dadweynaha, maadaama uu yahay ururkii maamulka hadda talada haya.

Waxa aynu haddaba si gaara  (case study) maqaalkan ugu eegaynaa ururka KAAH iyo ol’olihii uu ka galay gobolka Sanaag.Waxaynu si gaara u qaadaa dhigdoonaa:

1. Sidee Kaah uga ol’oleeyay Gobolka Sanaag?
2. Kaah iyo bulshada?
3. Ururka Kaah ma dhowray shuruucdii iyo xeerarka doorashada?
4. Ma dhawray xuquuqihii dastuuriga ahaa ee muwaadinka reer Puntland lahaa?  iyo
5. Arrima kale oo ku gedaaman hawlgalkii Kaah ee gobolka Sanaag.

**Ururka KAAH iyo Gobolka Sanaag**

Ururka KAAH waa ururka la filayo in uu codadka ugu badan ka helo gobolka Sanaag, waxaana sababaya qoddobadan:

1. **Wacyigelinta:**
   Guddiga ku-meel gaarka ah ee doorashooyinka Puntland (TPEC) ayaa u xilsaaran habsami u socodka, maareynta iyo qabashada shaqooyinka doorashada oo ay ka mid yihiin:

   b) Qorshaha iyo dejinta habraacyo iyo siyaasado hufan oo lagu hago doorashooyinka,
   t) Maamulidda, maareynta iyo qabashada doorashooyinka dawladdaha hoose,
   j) Diiwangelinta ururada siyaasadda,
   x) Diiwaangelinta muwaadiniinta codayn kara iyo
   kh) Arimo kale oo Dastuurka dawladda Puntland, Xeerka Guddiga doorashooyinka Puntland iyo xeererka kale siinayaan.

   Dhinaca sharciga sida ku cad, Xeerka Ururada Syaasadda Puntland qoddobkiisa 4-aad, waxyaalaha ka reeban ururada siyaasadda/xisbiyadda:

   "**[4] Urur ama xisbi kasta waxaa ka reeban innuu hantida qaranka Puntland u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee doorashooyinka",** islamarkaana haddii uu la yimaado xisbi ama urur arrinkan wuxuu waayayaa aqoonsigiisa ururnimo ama xisbinimo sida uu sheegayo qodobka shanaad ee isla xeerkani.

   Marka aynu eegno bulsho ku cusub hannaanka dimuqraadiyadda, markii ugu horaysay doonaysa in ay hoggaankeeda doorato, lana soo qabsatay sed-bursi, eex, nin jeclaysi, hannaankeeda awood qaybsiguna ku dhisnaa qabiil, isla markaana aan helin wacyigelin ku filan, waynu malayn karnaa in ay adkaanayso awood iyo waayo aragnimo ay ku kala hufto, oo kala haadiso dooddaha iyo afkaarta uu siyaasiga danaystaha ah miiska u soo saarayo.

   Si haddaba dhammaan shaqooyinkan si hufan loo qabto, islamarkaana Gudiga Doorashooynka Puntland (TPEC) uga soo baxdo hawshii loo xilsaaray, bulshadana u gaarsiiso hannaanka doorasho xor ah, waxaa waajib ah in ay wacyigelin ballaadhan gaadhsiiso bulshada reer Puntland, iyo degaankasta oo doorashadu ka dhacayso, sareynta sharciga iyo habraaca nidaaamka doorashooyinkana loogu dhaqmo si siman, oo ku salaysan caddaalad. Haseyeeshee tani ma dhicin, oo bulshada qaybo badan oo ka mida ma gaadhin wacyigelintii ay u baahnaayeen, sharcigiina looma fulin si ku dhisan caddaalad.

Sidoo kale dad badan oo ka mid ah indheergaradka bulshada reer Puntland wuxuu u arkaa in TPEC ay ka gaabisay kalintaas, iyada oo dowrka ururada siyaasadduna uu aad u liito, qaar ka mid ahina ayba qaadaceen ka qayb galka doorashada.

"*Waxaa la dhihi karaa wacyigelini ma jirin, TPEC iyo hay'addihii kala shaqaynayey wacyigelinta aad ayay uga gaabiyeen dawrkoodii, sidoo kale urarada siyaasadu wax wacyigelina ma siin bulshada*" sidan waxaa sheegay Maxamed Siciid Faarax, oo ka mid ah aqoonyahanada bulshada Sanaag, isaga oo ka hadlayay sida bulshadan baylahda looga helay.

Haddaba maadaama uu hooseeyay heerka wacyigalineed ee shacabka Puntland, waxa ay sababtay in si ka baxsan sharciga loo adeegsado, oo qorshayaal been abuur ah dadka lala wadaago, iyada oo tusaale ahaan uu Ururka Kaah ku dhaqmay awood sheegasho iyo cabbudhin, wakhtigii diiwaangelinta cod bixiyayaasha, hantidii bulshadana uga dhigay mid ururku leeyahay.

Arrimaha ugu waawayn ee u suurtageliyey ururka Kaah in uu bulshada Sanaag sida uu jecelyahay wax ugu sheego, isagoo aan u aabba yeelayn sharciga, iyo Ilaalinta hannaanka toolmoon ee xeerarku dhigayaan, waa ku takrifal awooddeed (abuse of power), baalmarka sareynta sharciga , wacyigelinta bulshadu ay heshay oo aad u yareyd iyo fahanka ay hannaankan ka haysteen oo aad u hooseeya. Taasi oo keenaysa in si dhib yar loo khaldo.

## 2. Dowrkii iyo loollankii ururada kale oo aan jirin:

Habsami u socodka iyo xalaalleyta doorashada, waxa udub dhexaad u ah doorka ururada siyaasadda, ee u taagan ka qeyb galka nidaamka dimuqraadiyeynta Puntland. Haddaba doorka iyo ka qeyb qaadashada doorashooinka wajiga labaad ee dhamaystirka doorashooyinka golaha degaannada Puntland, ayaa lagu tilmaami karaa mid aad u liita.

Dhammaan ururada siyaasadda ee Puntland marka laga reebo ururka Kaah, wax ol'lole iyo qorshe ku aadan tartanka kama samayn gobolka Sanaag. Waxaa si cad oo toos ah u muuqatay in ururada kale aanay wax kaalin ah ku lahayn gobolka iyo guud ahaan Puntland, iyada oo tabarta ururadu aad u liidatay. Taasi oo lagu sababeyn karo iyaga oo aan helin taageero dhaqaale, si markaasi ay ugu yeeeshan kaalin muuqata barnaamijka doorashayinka Puntland. Tani waxay u sahashay ururka Kaah, oo heysta tageerada iyo dhaqaalihii dowladda, in ay fursad u siiso oo uu xoog iyo awood dheeraada ku yeesho golayaasha tartanka.

Qaar kamida ururada oo aan waydiinay sababta ay uga daaheen tartanka, waxay sheegeen in ay xafiisyo iyo joogitaan ku lahaayeen degaano badan, balse markii aan u kuur galnay, dhibaatada ugu weyni waxay aheyd culeys xaga dhaqaalah ah, iyada xafiisyadii ururada ka furteen degaanadu noqdeen kuwa iska xiran, oo aan wax hawl ahi ka socon oo aan shaqayn.

3. Ururka **KAAH** in uu xoog iyo awood ku yeesho **Gobolka Sanaag** isla markaana ol'ole ballaadhan ka sameeyo, waxaa kale oo qayb lixaad leh ka qaatay laba arrimood oo kala ah:

    b. S**iyaasiyiinta gobolka ugu metesha Dawladda Puntland**: Ururka KAAH wuxuu gobolka Sanaag u diray siyaasiyiin isugu jira Xildhibaano, Wasiirro, Agaasimayaal kasoo jeeda gobolka oo ka tirsan ururka KAAH. Masuuliyiintani waxay shirar la qaateen odayaashii dhaqanka ee hoggaanka u ahaa bulshada degaanka, oo ay u arkayeen halka ay bulshadu ka nugushahay, waxayna u sheegeen in reerkastaa ay keensadaan xildhibaanadooda. Reerkastaana wuxuu xisaabiyey tirade codadka uu haysto islamarkaana wuxu soo sharaxay tirade xildhibaanada uu heli karo. Taasi oo culeys iyo caqabad ku noqotay uraradii kale.

    Haddaba ururka Kaah oo ka faa'idanaysa awoodda xukuumadda, ayaa culeys saaray qeybihii kala duwaan ee bulshada, ilsamarkaana si i ay is af-garad u xaqiijiyaan hoggaanka bulshadana aanay u lumin kalsoonidooda, waxay Kaah liiska kusoo saareen xubnihii odayaashu u keeneen.

    **t. Gollihii deegaanka ee hore**: xubnaha gollaha degaanka ee jira wuxuu ururka u fududeeyey in ay ololе ballaadhan ka galaan gobolka, in ay tuulo tuulo iyo degsiimo degsiimo u booqdaan iyagoo ka faa'iidaysanaya awoodda, mas'uuliyadda ay bulshada u hayaan iyo magaca ay ka dhaxleen booska ay joogaan. Sababta ugu wayn ee tallaabadan ku riixaysayna waa inay KAAH siiso fursad ay isku sharraxaan oo haddii ay helaan ay u arkayeen in ay soo baxayaan, kuna soo noqonayaan booskoodi.

Labadan qodob ee aan kor ku soo xusnay, waxay saamayn togan ku yeesheen, isla markaana qayb lixaad leh ka qaateen, in qorshihii KAAH gobolka uu xildhibaanada ugu badan kaga heli lahaa u hirgalo. Waxaana muuqata in mas'uuliyiinta gobolka heer dawladda dhexe ee Puntland iyo heer dawlad hooseba uu aad uga faa'iidaystay. Odayaashii dhaqanka oo ah cidda bulshadaasi aadka ugu tiirsantahay, uu Kaah awoodiisa dowladda iyagoo adeegsanaya ay ka dhigteen shebeg ay bulshada kale ku dabtaan.

**Qorshaha KAAH si uu ugu guuleysto doorashada gobolka Sanaag?**

Qorshaha iyo fursadda KAAH ay xildhibaannada ugu badan ku heli karto, ayaa aad u saraysa marka loo eego ururada kale, waxaana muujinaya arrimahan:

1. Muwaadiniin uu dastuurku u bannaynayo in ay is sharraxaan sida dhallinayarada qaar oo loo diiday, sababtuna ay tahay in KAAH ay xiratay xaydaabka si ku dhisan qaab qabiil. Dhallinyarada ugu badan ee falkan hor-istaagga ah la kulmay waa dhallinyarada ururada kale iska sharraxday, waxaana soo baxayey in odayada dhaqanka iyo mas'uuliyiinta KAAH ay kawada shaqaynayeen in qofka la tanaasuliyo, lagana hor istaago inuu is sharxo

   Falkan macnihiisu wuxuu noqonayaa in qofka laga hor istaago inuu xuquuqihiisii dastuuriga ahaa ka f a'iidaysto oo ay ugu waawaynyihiin in uu is sharraxo oo la dooran karo, iyo in uu urur siyaasaddeed ku biiri karo oo uu ka qayb qaadan karo arrimaha siyaasadda:

   ′"muwaadin kasta oo da'addiisu gaartay sideed iyo toban [18] sanno wuxuu xaq u leeyahay: inuu ka qayb-galo hawlaha doorashooyinka, iyo innuu cod bixiyo, inuu sameeyo ama ku biiro urur ama xisbi siyaasadeed, innuu xiliyada doorashada u tartamo xilalka dalka, haddii uu shuruudaha buuxiyo" "Muwaadinkasta oo buuxiya shuruudaha doorashada wuxuu xaq u leeyahay innuu wax dooran karo lana dooran karo"[1]

2. Qabiilkasta oo Sanaag dega isaga ayaa soo xushay xubnihii ururka KAAH u meteli lahaa, waxayna ahayd is af-garad dhexmaray mas'uuliyiinta KAAH ee deeganka tegay iyo hoggaanka dhaqanka.

   Qodobakani waxuu meesha ka saarayaa in KAAH soo sharaxdo qof xanbaarsan mabaadi'dii iyo aragtiyihii KAAH, balse taa bedelkeeda uu yimaado qof reerkiisu keensaday, oo isagoo gacanta lahayo inta KAAH loo keeno, oo isaguna ku daray liiska Xildhibaanada uga sharaxan degmadaa.

3. Markay hoggaanka bulshada Sanaag, xubnihii dawladda, degaanka iyo ururka KAAH isku af-garteen hannaanka ay uga wada shaqayn karaan in ururka KAAH soo baxo, waxaa laysla gartay in xubnaha loo soo xulay xildhibaanada mid kasta loo xiro (goob cod (seejooyin) u gaar ah, iyadoo lagu qiimaynayo tirade goobta coddeynta taal, layskuna dayeyo in qofkasta lagu beego goob reerkiisu ku badanyihiin. Tusaalle qofku wuxuu goob cod ka noqonayey [A], goob kalena [B] iyadoo loo eegayo tirade codadka uu kusoo bixi karo.

[1] Fiiri qodobadda 41 iyo 44 dastuurka dawladda Puntland.

**Goodiska KAAH:**

Khudbadaha iyo soo jeedinta KAAH, waxay muujinyeen goodis, in ay bulshadu waayi doonaan mashaariic hadda u socota, haddii aanay ururka Kaah u coddeyn oo aanay helin xildhibaanada ugu baddan gollaha degaanka, islamrkaana aanu KAAH ku guulaysan Gollaha degaanka Degmooyinka Sanaag.

**Arrimihii ugu cajiibsanaa ee bulshada ay Kaah la hadleen ka soo xigteen, waxaa ka mid ahayd**:

1. In bulshada reer Sanaag haddii ay doonayaan in wadadda Ceel-Daahir Ceerigaabo loo dhammaystiro ay la shaqeeyaan ururka dawladda "KAAH", weliba hadda ay miiska saarantahay 50, 000 oo foosto oo Daamura oo waddada lagu geynayo Haadaaftimo.

Arintani waxay muujinaysaa in bulshada gobolkaa degta la rabo in ay codkooda ku bedeshaan in wadadaa loo dhammeeyo. Waan sharci daro, in bulshadu wixii ay xaqa ugu lahayd dawladda loogu goodiyo innay ku waayi karto haddii ay fulin waydo dalabka dawladda.

Sidoo kale waxay daliil cad u tahay sida dawladu ururka KAAH ugu dawladaynayso bulshada, hantidii bulshadana uga dhigayso mid ururku leeyahay, waxay kalooo daaha ka faydaysaa ku takri falka awoodeed ee xukuumada Deni ku dhaqmayso si ay ugaadho dameceeda siyaasiga ah.

2. Mid kamida mas'uuliyiinta dawladda oo ka khudbadaynaya degaan ka tirsan gobolka Sanaag ayaa bulshadii uu hadalka u jeedinayey ku yiri "dawladda saddex sanno ayaa u hadhay, waana sannadka muda xileedkeeda ka hadhsan, iyo laba sanno oo miiska u saaran" waxaa kaloo khudbadiisa ku jirtay "Saddexdaa sanno dawladda la shaqaysta", wuxuu kaloo yiri haddal u dhigmaya "Haddii aad rabtaan in aad nagula xisaabtantaan mas'uuliyadda aanu gobolka u hayno, waa innaad ururka dawladda "KAAH" soo saartaan".

Haddaba dhammaan markaynu isku soo duubno hadalka mas'uulkan oo nuxurka ula jeedadiisa eegno, waxaa inoo soo baxaysa dhawr arrimood:

**b.** In mas'uulkaasi uu geed dheer iyo geed gaaban u fuulay in ay bulshadaasi KAAH u codayso, sababta keentay innuu sidaa ugu caddaadiyo bulshadana waa jagada uu ku fadhiyo ee uu isla bulshadaa ku metelo.
**t.** In bulshada halkii wax loo qabanayo looga balan qaadi lahaa, oo horumar cusub oo ay soo dhoweyaan loo sheegi lahaa, loogu goodiyo in inta yar oo ay haystaan ay waayi doonaan.
**j**. In dawladdu mudda korodhsi samaynaso, taasoo keeni karta haddii bulshadani aanay ururka dawladda u coddayn innay waayi doonto taageerada dhanka dawladda, mudadaa ay sii joogi doonto waa haddii ay usuurgasho mudda korodhsigu eh.

3. Waxaa kaloo khudbad mas'uul jeediyey ku jirtay "Urarka dawladdu waxuu gaadhayaa meel aanay ururada kale gaadhin, waxa u sahlayaana waa lacagtiisa".

Arrinkani waxuu xoojinayaa caddaymihii tirada badnaa ee muujinayey sida dawladu xoolihii dadwaynaya iyo hantidii bulshada ka dhexaysay ee ay iyadu maamulaysay ugu takrifalayso, uguna adeegsanayso ol’olaha doorashada.

Dhammaan qodobadan kor ku xusan markii nuxurkeeda la akhriyo, waxa cad in dawladda Siciid Deni ay hantidii dawladda aad ugu adeegsanayso in ay ururka KAAH kusoo saarto, si uu uga mid noqdo ururada la rajaynayo in ay kusoo baxaan doorashada goloyaasha degaanka dawladda Puntland. Taasi oo meesha ka saareysa in si siman, daahuran oo ku dhsan caddaalad loo tartamo.

Su’aasha isweydiinta muddan ayaa ah, kol haddii doorashada golayaasha degaanka laga dhigay mid awood, daah-furnaan la’aan iyo cabudhis ay hadheeyeen, islamarkaaa ururka Kaah guul iyo qeyb libaax ka heli doono natiijooyinka, golayaasha degaanka cusubi ma ka duwanaan karaan kuwii la soo magacaabi jiray, doorashadu se ma ka tarjumaysaa rabitaanka shacbiga in ay helaan metelaad dhab ah.

Tifaftirka WardheerNews
Email admin@wardheernews.com

Halkan ka akhri Tifaftirka WardheerNes- archives